

## **Maamulaha Roseway Heights waa lagu sharfay inuu u heellan yahay sinnaanta**

Maamule Phu Dao wax badan ayuu u yahay ardayda iyo shaqaalaha Dugsiga Dhexe ee Roseway Heights: lataliye, qof lagu daydo, horyaal, saaxiib. Weydii qof kasta oo wax ka bartay oo la soo shaqeeyay, waxayna kuu sheegi doonaan inuu shaqadiisa oo dhan u huray u doodista ardayda, qoysaska, iyo macallimiinta. Haddana waa lagu sharfay dedaalkaas.

Courageous Conversation, Hay'ad fadhigeedu yahay Washington, D.C. oo aan faa'iido doon ahayn ayaa u magacaway Maamulaha Dao inuu yahay qaataha sanadkan Abaalmarinta Dr. Charles Hopson Hogaaminta Maamulaha Sinnaanta Jinsiyadeed. Courageous Conversation wuxuu la shaqeeyaa dadka iyo hay'adaha si wax looga qabto farqiga jinsiyadeed iyada oo loo marayo wadahal joogto ah, wax soo saar leh.

Maamuuskan, oo loogu magac daray maamulihii hore ee Dugsiyada Dadweynaha Portland iyo hoggaamiyaha degmada, waxay aqoonsanaysaa heerka sare ee abaabulka iskaashiga iyo wada-sheekaysiga macnaha leh ee u dhexeeya xubnaha bulshada iyo dugsiyadooda. Waxa si rasmi ah loogu aqoonsan doonaa Austin, Texas horraanta Noofembar.

Sida laga soo xigtay Dr. Kehaulani Haupu, Agaasimaha Courageous Conversation ee iskaashiga degmada PreK-12, Maamule Dao wuxuu ahaa musharax aad u wanaagsan oo loo doortay Abaalmarinta Charles Hopson, taas oo u furan maamulayaasha dugsiyada Maraykanka iyo Kanada.

Shaqada Phu waxay tusaale u tahay hogaaminta maamulaha kaas oo saamayntiisa togan ka baxsan derbiyada dugsiyiisa oo uu galo bulshada weyn," ayay tidhi. "Runtii ma jiro qof isaga ka mudan".

Maamule Dao waxa uu socdaalkiisa ka bilaabay Dugsiyada Dadweynaha Portland isaga oo arday ah 1989kii. Laba iyo labaatan sannadood ka dib, waxa uu noqday Isuduwaha Wacigelinta degmada. Ka dibna sanadka 2018 , markii wiilkiisu ku jiray Kindergarten ee Dugsiga Hoose Rose City Park, wuxuu ku biiray Kooxda La-talinta Labada Luuqad ee Fiyatnaamiiska , kaas oo ahaa guddi loo xilsaaray inay dugsiya ka bilaabaan barnaamijka immersion-ka ee luqadda Fiyatnaamiiska.

Muddadii uu ka tirsanaa guddiga, waxa uu u ololeeyay barnaamijka immersion-ka, isagoo isla markaasna u adeegaya sidii buundo qiimo leh oo u dhaxaysa bulshooyinka ku hadla Ingiriisiga iyo Fiyatnaamiiska.

"Phu wuxuu awooday inuu si fikir iyo ula kac ah u dejiyo xiisada u dhaxaysa bulshooyinkaas oo u dugsiya u wado jihada wanaagsan," Dr. Haupu ayaa yidhi.

Maamule Dao wuxuu ahaa kaaliyaha maamulaha dugsiya dhexe Shahala ee degmada dugsiya Evergreen, halkaas oo uu mudnaan siiyay horumarinta xirfadeed ee shaqaalaha ku salaysan sinnaanta jinsiyadda, wuxuuna si adag ugu dhiirigeliyay macallimiinta inay qiimeeyaan codadka

ardayda, gaar ahaan ardayda Madowga iyo Asaliga ah. Wuxuu sidoo kale hogaamiyay dhacdooyinka ardayda ee loogu talagalay ragga dhalinyarada midabka leh, wuxuuna bil walba hogaamiyay koox xiriir la leh bulshada Aasiyaanka oo loogu talagalay waalidiinta iyo shaqaalaha.

Khibraddiisa waxa ka mid ah inuu ahaa Lataliye/Kormeeraha Guusha Ardayga. Barnaamijkan, oo markii ugu horreysay la hirgeliyay 2016, wuxuu ku xirayaa ardayda aan loo adeegin adeegyada isirka iyo luqadda gaarka ah si looga caawiyo inay si guul leh u maraan dugsiga sare.

Maamule Dao ayaa mas'uul ka ahaa hagida saddex iyo tobanka shaqaale bulsho ee u heellan degmada maadaama ay ku taageerayaan ardayda safarkooda waxbarasho. Natiijadu waxay ahayd guul aan shaki lahayn. Farqiga u dhexeeya jinsiyadda ee heerarka qalin-jabinta ayaa xirmay iyadoo arday badan oo midab leh ay heleen kaalmada ay u baahan yihiin si ay u guuleystaan.

"Phu had iyo jeer wuxuu ahaa horyaal sinaanta," ayuu yidhi Chris Frazier, maamulaha sare ee dugsiyada PPS. "Wax kasta oo uu sameeyo waa u adeegida ardayda iyo abuurista fursado iyo deegaan loo dhan yahay qof walba."

Isagoo ah maamulaha dugsiga Roseway Heights, Dao wuxuu sii wadaa shaqadii muhiimka ahayd ee uu bilaabay sanado ka hor isagoo waalid ah oo ku hawlan dhaqdhaqaaqa bulshada heerka hoose.

"Phu wuxuu ahaa xubin ka tirsan koox waalid halkaas oo uu ku hawlanaa wada-hadallo muhim ah oo ku saabsan jinsiyadda iyo luqadda iyo u doodista. Kadib waxa uu u shaqaynayey maamule ahaan kaas oo sameeya dadaal kasta si uu u dhegeysto oo kor loogu qaado codadka bulshada," ayuu yidhi Dr. Haupu. "Waa sheeko ku saabsan hoggaan wax ku ool ah oo bulsho ahaan ku lug leh, waxaan ku hanweynahay in aan aqoonsanno wax ku biirinta cajiibka ah ee uu u sameeyay bulsho kasta oo uu u adeego."